

# Tallaalada u Dambeeyey ee COVID-19 Qaado

Oktoobar 2023



WARGA

Talaalka COVID-19 ee 2023-2024 kaasi oo lagaga hortagayo nooca fayraska ee hadda socda ayaa la ansixiyey laguna taliyaa in la isticmaalo.

## Talaalka COVID-19 ee 2023-2024

- Cid kasta oo jirta 6 bilood iyo wixii ka wayn waa inay qaadato ugu yaraan hal marqaadasho oo ah tallaalka COVID-19 ee 2023-2024 (Pfizer ama Moderna) si ay uga badbaado inay qaaddo jirro halis ah iyo isbitaalka in la dhigo.
- Qaadashada [talaalka COVID-19](#) waa habka ugu badbaadada badan ee difaaca jirro halis ah qofku ku helo karo-xataa kuwa horey u qaaday COVID-19.
- Dadka da'doodu tahay 5 iyo wixii ka wayn waxay qaadan karaan hal marqaadasho oo ah tallaalka COVID-19 ee 2023-2024 (Pfizer ama Moderna) haddii ay ugu yaraan laba bilood ka soo wareegeen markii ay qaateen tallaal COVID-19.
- Dadka difaacooda jirku si fudud ama daran dacifay waxay u baahan karaan qaadashada marqaadashooyin dheeraad ah.
- Caruurta jira 6 bilood ilaa 4 sano waxay u baahan karaan marqaadashooyin dheeraad ah iyadoo ku xiran jadwalka iyo tallaalada COVID-19 ee hore.

## Raadi Tallaalada COVID-19

- Tallaalada COVID-19 ee 2023-2024 waxa laga heli doonaa xarumaha daryeelka asaasiga ah, farmasiyada, xafiisyada caafimaadka deegaanka iyo goobo kale oo Vermont ku baahsan. Fadlan ka hubi goobta aad ka qaadato tallaalada kale ee caadiga ah markaad ballanta qabsanayso. Ka raadi goobaha tallaalka [Vaccines.gov \(lifaaga waa Ingiriisi\)](#).
- Tallaalada COVID-19 wali waa bilaash, laakiin hadda qaabka loo bixiyo lacagtut wuxuu aad ugu dhawayahay sida loo bixiyo lacagta tallaalada kale. Marka la eego dadka intooda badan, caymiska caafimaadkooda ayaa dabooli doona kharashka qaadashada tallaalka.
- Marka la eego dadka aan lahayn caymis caafimaad, ama kuwa leh caymis aan laakiin daboolin kharashka tallaalka (ma badna), [Barnaamijka Tallaalka Vermont \(lifaaga waa Ingiriisi\)](#) ama Barnaamijka

Somali

[Bridge AccessKu meel-Gaarka ah ee Xarunta Ka Hortaga iyo Xakamaynta Cudurada \(CDC\)](#) (lifaaqa waa Ingiriisi)

- Cid kasta waa la tallaali karaa Vermont, oo ay ku jiraan kuwa deggan gobol kale, kuwa aan ahayn muwaadiniin Maraykan ah, ama kuwa bilaa caymiska ah.

Ogow: Medicaid ma caymiso kharashka carruurta Medicaid caymisay si ay talaalka uga helaan farmasiyada Vermont.

### **Caawimada Qaadashada Talaalka**

- Cid kasta oo aan lahayn caymiska caafimaadka waxay talaalka kaga heli kartaa ballan [xafiisyada caafimaadka ee deegaanka \(lifaaqa waa Ingiriisi\)](#). Xafiisyada caafimaadka ee deegaanku sidoo kale waxay gacan ka gaysan karaan tallaalidda dadka da'doodu ka yar tahay 65 jir haddii aysan awoodin inay talaalka ka qaataan goobo kale iyadoo sababtu tahay gaadiid la'aan ama caqabado kale.
- Ma u baahan tahay gaari raacitaan? Haddii aadan heli karin gaadiid ku geeya goobta talaalka COVID-19, fadlan la xiriir bixiyaha gaadiidka dadwaynaha ee deegaankaaga ama wac [Ururka Gaadiidka Dadwaynaha Vermont \(VPTA\) \(linkigu waa Ingiriisi\)](#) 833-387-7200.
- Ardayda luuqadda Ingiriisida barata, muhaajiriinta ama xubnaha bulshooyinka qaxootiga ee jeelaan lahaa inay wax badan ogaadaan waxay la xiriiri karaan [Ururka Afrikaanka Deggan Vermont \(linkigu waa Ingiriisi\)](#) (AALV) 802-985-3106.

Somali